SEIU 775
BENEFITS GROUP

Health




# 2021 Open Enrollment (Muddada Diiwaangelinta Sanadlaha ah ee Ceymiska Caafimaadka)

## Luuliyo 1–20 ee Loogu Talagalay Adeeg Bixiyeyaasha Shaqsiyadeed

### Xirmadan waxaa ku jiro macluumaad loogu talagalagay:

✓ Daryeel bixiyeyaasha haddaba ka diiwaangashan ceymiska caafimaadka.
✓ Daryeel bixiyeyaasha xaq u leh ee codsan kara ceymiska.

## Inta lagu jiro Open Enrollment (Muddada Diiwaangelinta Sanadlaha ah ee Ceymiska Caafimaadka) waxaad:

✓ Codsan kartaa ceymiska caafimaadka (haddii aadan horay isku diiwaangelinin).
✓ Isbaddelo ikhtiyaari ah ku sameyni kartaa ceymiska ilkaha (haddii aad diiwaangashan tahay).
✓ Baran kartaa sida looga helo faa'iidada ugu badan dheefahaaga caafimaadka.

## Ku buuxi oo ku soo celi Codsigaaga Dheefaha Caafimaadka onlayn ahaan ama boostada marka la gaaro ama ka hor **Luuliyo 20**.

**Wax u cusub IP-yada:** Waxaad wax ka baddeli kartaa ceymiskaaga kaliya inta lagu jiro Open Enrollment (Muddada Diiwaangelinta Sanadlaha ah ee Ceymiska Caafimaadka). Kuwa cusub ee isdiiwaangeliyay wuxuu ceymiska u bilaaban doonaa laga bilaabo Agoosto 1. Haddii aad hadda diiwaangashan tahay, waxaad sii heli doontaa isla ceymiska aad hadda heysato haddii aan wax ficil ah la sameynin.

Haddi aadan weli yeelanin ceymiska caafimaadka oo aad jeclaan lahayd inaad codsato:

✓ Buuxi oo gudbi Codsiga Dheefahaha Caafimaadka.
✓ Bixi $25 bishiiba.
✓ Sii wad inaad ka shaqeyso 80 saacadood bishiiba si aad xaq ugu sii lahaato.*
✓ Ku raaxeyso Ceymiskaaga caafimaadka ee Kaiser Permanente!

*Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan shuruudaha xaq u yeelashada, fadlan ka tixraac bogga intarnetka ee Open Enrollment (Muddada Diiwaangelinta Sanadlaha ah ee Ceymiska Caafimaadka) ee barta **myseiu.be/oe2021.**

June 15, 2021 4:03 PM

# Macluumaad iyo Tilmaamo ku Qoran Luuqadaada

**Gói này cũng được cung cấp bằng ngôn ngữ của bạn tại địa chỉ myseiu.be/oe2021-vi.** Nếu bạn có câu hỏi, hãy gọi theo số **1-877-606-6705**, từ 8 giờ sáng đến 6 giờ chiều theo giờ Thái Bình Dương, Thứ Hai tới Thứ Sáu.

**此套文档可提供您的语言版本，网址：myseiu.be/oe2021-zh**。如有任何疑问，请致电 **1-877-606-6705** 太平洋时间周一至周五早上 8 点至下午 6 点)。

**이 패킷은 myseiu.be/oe2021-ko 에서 귀하의 모국어로 제공됩니다.** 궁금한 사항은 태평양 표준시 기준으로 월요일부터 금요일까지, 오전 8시부터 오후 6시 사이에 **1-877-606-6705** 로 전화하십시오.

**Este paquete está disponible en su idioma en myseiu.be/oe2021-es.** Si tiene alguna pregunta, llame al **1-877-606-6705**, de lunes a viernes de 8 a. m. a 6 p. m., hora del Pacífico.

**Пакет доступен на вашем языке на сайте: myseiu.be/oe2021-ru.** Для получения дополнительной информации звоните по телефону **1-877-606-6705** с понедельника по пятницу с 8:00 до 18:00 часов (по Тихоокеанскому времени).

**هذه الحزمة متوفرة بلغتك على myseiu.be/oe2021-ar.** إذا كانت لديك أسئلة، اتصل على الرقم **1-877-606-6705** من الساعة 8 صباحا حتى 6 مساء بتوقيت المحيط الهادئ، من الإثنين إلى الجمعة.

**ይህ ፓኬት በእርስዎ ቋንቋ myseiu.be/oe2021-am. ሊገኝ ይችላል።** ጥያቄዎች ካልዎት ወደ **1-877-606-6705**፣ ከ 8 a.m. እስከ 6 p.m. በፓስፊክ ሰዓት አቆጣጠር ከሰኞ እስከ ዓርብ መደወል ይችላሉ።

**Xirmadan iyada oo luuqadaada ah waxaa laga heli karaa bogga intarnetka ee myseiu.be/oe2021-so.** Haddii aad wax su'aalo ah qabto, wac **1-877-606-6705**, 8 a.m. ilaa iyo 6 p.m. Pacific time, Isniin-Jimce.

# Jadwalka Tusmada

Xirmadaada waxaa ku jiro faahfaahin kooban oo ku saabsan ceymiskaaga caafimaadka, soo koobida ceymiska ilkaha caafimaadka iyo ilkaha iyo erayada guud ee ceymiska caafimaadka. Waxaad sidoo kale heli doontaa foomyaasha aad u baahan tahay si aad isku diiwaangeliso haddii aadan diiwaangashanayn ama aad wax ka baddel ikhtiyaari ah ugu sameyso ceymiskaaga haddii aad kolhore is diiwaangelisay.

**Wax u cusub IP-yada:**
Mudda xilleedka isdiiwaangelintiina way isbaddeleysaa! Ka hor 2021, Adeeg Bixiyeyaasha Shaqsiyadeed (IP) waxay awood u lahaayeen inay iskudiiwaangeliyaan ama wax kaga baddelaan ceymiskooda inta lagu jiro sanadka oo dhan. Laga bilaabo Luuliyo 2021, waxaad awoodi doontaan inaad iskudiiwaangelisaan ama wax kaga baddeshaan ceymiskiina kaliya inta lagu jiro Open Enrollment (Muddada Diiwaangelinta Sanadlaha ah ee Ceymiska Caafimaadka) ama haddii aad leedahay dhacdo nololeed muteysi leh.


***My Plan***
Wax ka baddel samee ama onlayn ahaan isku diiiwaangeli ........ Boggaga 4-5

**Guudmarka**
Qoddobada kooban ee ceymiska caafimaadka ........ Boggaga 6-7

**Caafimaadka**
Soo koobida ceymiska caafimaadka ........ Boggaga 8-9

**Ilkaha**
Soo koobitaanada ceymiska Ilkaha ........ Boggaga 10-13

**Erayada Guud ee Ceymiska** ........ Bogga 14


# Sida La Isku Diiwaangeliyo ama Wax Ka Baddel Loo Sameeyo

## Onlayn ahaan

Waxaad buuxin kartaa foom onlayn ah adiga oo adeegsanaya *My Plan.* Booqo **myseiu.be/oe-myplan** si aad wax badan u ogaato.

## Boostada ama Fakiska

Ku dir codsigaaga cinwaanka ku qoran Codsiga Dheefaha Caafimaadka. Khidmada boostada Mareykanka ayaa la iska rabaa. Amaa fakis ugu dir 516-723-7395.


**Wixii su'aalo ah, wac Lambarka Adeegga Macaamiisha ee SEIU 775 Benefits Group | 1-877-606-6705 | 8 a.m. - 6 p.m., Isniin-Jimce | myseiubenefits.org**

# Isku Diiwaangeli ama Wax Ka Baddel Ka Samee *My Plan*!


## Ka furo akoon aad ka gasho *My Plan*

Tag **myseiu.be//oe-myplan** si aad iskuugu diiwaangeliso adeegsade cusub ahaan adiga oo raacaya talaabooyinkan:


### Tallaabada 1: Dooro Register as a New User (Isku Diiwaangeli Adeegsade Cusub ahaan).





### Tallaabada 2: Geli ID-ga Xubnaha ama Lambarka Social Security (SSN).





### Tallaabada 3: Geli Lambarka Zip-ka iyo Taariiqda Dhalashada.





### Tallaabada 4: Dib U Eeg oo Aqbal Qodobadda iyo Shuruudaha.





### Tallaabada 5: Buuxi magaca adeegsadaha, lambar sireedka iyo su'aasha ammaanka.




### Tallaabada 6: Buuxi macluumaadka xiriirka oo Save Communication (Keydi Wada-xiriirka).




### Tallaabada 7: Save Acknowledgements (Keydi Qiraalada).





**Su'aalo miyaad qabtaa?** Wac **1-877-606-6705,** 8 a.m. to 6 p.m. Pacific time, Isniin ilaa iyo Jimce, ama iimayl u dir **SEIU775BG-caregiver@magnacare.com.**

# Isku Diiwaangeli Ceymis

**Tallaabada 1: Gal oo eeg macluumaadka ceymiskaga caafimaadka ama isku diiwaangeli ceymis.**

Haddii aad xaq u leedahay inaad isdiiwaangeliso, waxaad fursad u yeelan doontaa inaad gujiso **Start Enrollment (Bilow Diiwaangelinta).**




**Tallaabada 2: Dulmar iska diiwangelinta *My Plan***

- Dooro Loo-shaqeeyahaaga Koowaad. Kani waa loo shaqeeyaha ka jaran doona khidmada ceymiska ee $25 bil walba mushaharkaaga. Loo-shaqeeyahaaga koowaad waxaa laga dhigi karaa mustaqbalka loo-shaqeeye labaad, iyada oo ku saleysan tirada saacadaha billaha aad shaqeyso.
- Dheef walbo waxaad arki doontaa macluumaadka xaq u yeelashada ee Hay'adaha Daryeelka Bixiya (AP-yada) iyo Adeeg Bixiyaha Shaqsiga (IP-yada) labaduba.

**Tallaabada 3: Wax ka baddel doorbiditaanadaada, sida:**

- Sida aad rabto in laguugula soo xiriiro – iimayl, taleefon ama boosto ahaan.
- Luuqada aad doorbideyso.

**Tallaabada 4: Isku diiwaangeli ceymiska caafimaadka:**

- Ceymiska caafimaadka – Ceymiskaaga waxaa lagu doortaa iyada oo ku saleysan meesha aad ku nooshahay.
- Ceymiska ilkaha – isla barbardhig ceymisyada oo mid ka dooro noocyada ceymiska ilkaha ee la heli karo.
- Kheyraad kale ee caafimaadka ee aad heli karto, sida Caregiver Kicks, Ceymiska maqalka EPIC iyo Ginger.

**Tallaabada 5: Dib u eeg xulashooyinkaaga.**

**Tallaabada 6: Ku saxiix magacaaga adiga oo isticmaalaya muuskaaga ama shaashada taleefonka si aad u dhameystirto isdiiwaangelinta.**
Waxaad arki doontaa shaashada xaqiijinta waxaana laguu soo diri doona iimayl xaqiijin ah iyo warqad.

# Eeg oo wax ka baddel qorshaha ceymiskaaga

**Tallaabada 1: Gal *My Plan* si aad u eegto ama wax uga baddesho ceymiskaaga.**

**Tallaabada 2: Isticmaal sawir calaamadeedka safka ee ku yaala dhinaca bidix ee kore si:**

- Aad u hesho Soo Koobida Ceymiskaaga.
- Aad u eegto macluumaadka xaq yeelashadaada iyo dheeftaada.
- Aad wax uga baddesho ceymiskaaga ilkaha.
- Aad u eegto saacadahaaga shaqada.
- Aad u sameyso lacag bixinta shaqsiyadeed iyo wax kale oo badan!

**Ku soo dejiso app-ka taleefonka MyCreateHealth taleefonkaaga casriga ah si aad si fudud ugu isticmaasho *My Plan*.**

App-ka taleefonka MyCreateHealth waxaa laga heli karaa App Store oo ku jirta iPhone-kaaga, ama Google Play Store oo ku jirta taleefonkaaga Android.

GET IT ON Google Play

Download on the App Store



# Qoddobada Kooban Ee Ceymiska Caafimaadka

## Ku Hel Ceymiska Caafimaadka iyo Ilkaha oo Tayo Sare leh $25 oo Kaliya Bishiiba

### Ceymiskaaga waxaa ku jira dheefahan soo socda:

- Aragtida Dhakhtarka oo Bilaash ah
- Caafimaadka
- Toosinta Ilkaha
- Ilkaha
- Aragga
- Maqal
- Dhalmo la'aanta
- Daawada Dhakhtarku Qoro
- Taageero Niyadeed

## Ka Hel Faa'iidada Ugu Badan Ceymiskaaga

### Hel Dhakhtar Aad Jeceshahay

Daryeelka adiga ayuu kaa bilowdaa. Xiriir la sameyso dhakhtar aad ku kalsoon tahay adiga oo dooranayo dhakhtarka daryeelka assaasiga ah, kaas oo aad la kulmi karto iyada oo khidmada ceymiska aan lahayn. Waxaad kula kulmi kartaa dhakhtarkan booqashooyinka fayo-qabka, haddii aad xanuunsato ama aad u baahan tahay in laguu gudbiyo khabiir.

Waxaad ka xulan kartaa dhakhtarka daryeelka assaasiga ah bogga intarnetka ee Kaiser Permanente. Doorashada dhaktarka daryeelka assaasiga ah waa mid dhaqso la sameyn karo oo fudud. Si lagaaga caawiyo inaad akoon sameyso ama aad dhakhtar hesho, boooqo **myseiu.be/oe-doctor**.

### Daryeelka Caafimaad oo Lagu Helo Meel Walbo

Ceymiskaaga caafimaadka waxaad ku heleysaa daryeelka caafimaad oo lagu helo meel walbo oo habboon, bilaash ah ama qiima jaban – oo aad ku heleyso taleefon, tablet ama kumbiyuutar – marka laga soo tago booqashooyinka shaqsi ahaanta loo xaadiro. Waxaad ku raaxeysan kartaa daryeel shaqsiyadeed oo tayo sare leh, booqashooyin badqab ah oo habboon iyo dookh xulashooyinka tiknoolojі. Eeg **myseiu.be/ha-2021** wixi macluumaad dheeraad ah.

## Dheefo Dheeraad ah oo Adiga un Laguu Diyaariyay

### Self-care matters (Is-daryeelka waa muhiim): Dheefaha Caafimaadka Dareenka

Caafimaadka dareenka wuxuu muhiim u yahay sida caafimaadka jireed. Ceymiska waxaa ku jira daaweynta cilmi nafsiga, daawaynta, daaweynta koox ahaaned iyo daawooyinka kaaba ama baddelka u noqda kuwa kale, iyo sidoo kale:

- App-ka Ginger, kaas oo fududeeya in lala xiriiro macalin khabiir kaas oo talo iyo taageero ku bixin kara fariin qoraal bilaash ah, oo ammaan ah. Wax badan ka baro barta **myseiu.be/oe-ginger**.
- Ka wac Khadka Taleefonka ee Caafimaadka Dabeecada ee Kaiser lambarka **1-888-287-2680** ama booqo **myseiu.be/kaiser-bh**.
- Caawinta noolasha shaqsiyeed ee laga helo Resource Finder*. Iyada oo loo marayo Resource Finder, waxaad awoodi kartaa inaad hesho dhigaalada caafimaadka dareenka, daryeelka ilmaha, caawinta sharciyeed iyo wax kale oo badan. Booqo **myseiu.be/oe-resource** si aad wax badan u ogaato.

Caregiver KICKS™



Hel kabahaaga Caregiver Kicks bilaashka ah — oo simbirixada reeba — sanad walbo! Waa kuwo raaxo leh, waxay kugu ilaalinayaan shaqada waxayna u muuqdaan kuwa fiican. Waxaa lagu heli karaa 70 nooc, oo ay soo saareen shirkado caan ah sida Reebok iyo Skechers. Ka hel kabahaaga Caregiver Kicks barta **myseiu.be/oe-kicks**.

*Barnaamijka Caawinta Shaqaalaha ee loo maro U Doodaha Caafimaadka ma sii heli doonaan daryeel bixiyeyaasha laga bilaabo Agosto 1, 2021.



John R.
Bixiyaha daryeelka, Seattle

## U Maareey Daawo Qoraaladaada Dhakhtarka Si Caqli leh

Si wayn uga faa'iideyso dheefaha daawo qoraalkaaga dhakhtarka adiga oo fahmaya dhammaan dookhyadaada iyo waxa qiimahooda uu yahay.

*Daawooyinka lagu qiimeeyo waxtarkooda waa daawooyin baddel u ah kuwa kale oo loogu talagalay in lagu daaweeyo xaalado caafimaad oo kala duwan.

| Khidmada Adeegga Ceymiska ee Daawo Qoraalka Dhakhtarka (Bixiyaha u shaqeeya shirkada ceymiska) ee daawo 30 maalmood la qaato | Farmashiga Laga Qaadanayo | Ku Iibsashada Boostada |
|---|---|---|
| Daawooyinka ka hortagga uurka ee baddelka u ah kuwa kale | $0 | $0 |
| Daawooyinka Lagu Qiimeeyo Waxtarkooda* | $4 | $0 daawo la qaato 30 bari |
| Daawooyinka Beddelka u Noqda Daawo Kale | $8 | $3 daawo la qaato 30 bari |
| Liiska Dawwoyinka Shirkadaha Gaarka ah ee Ceymiska Ku Jira | $25 | $20 daawo la qaato 30 bari |

## CUSUB!

Booqashooyinka Dhakhtarkaaga Daryeelka Assaasiga ah (sidoo kale loo yaqaano Bixiyaha Daryeelka Assaasiga ah) bilaash ayay ka yihiin ceymiska.

## Waxyaabaha Baddelka u Ah Isticmaalka Qolka Gurmadka Degdegga ah

| Qolka Gurmadka Degdegga ah $200 Khidmada Adeegga Ceymiska | Xarunta Daryeelka Degdegga ah $0 Khidmada Adeegga Ceymiska | Dhakhtarka Aassaasiaga ah / Booqashooyinka Bilaashka ah Lacag La'aan |
|---|---|---|

**Ku Baaqso $200 inaad isticmaasho Xarumaha Daryeelka Degdegga ah.**
Haddii aad u baahan tahay daryeel degdeg ah, raadi xarunta daryeelka degdegga ee kuugu dhaw ama ballan isla maalintaas ah ka qabso dhakhtarkaaga. Waxaa kuu baaqan kara lacag ilaa iyo $200 ah.

**Daryeelka degdegga ah lamid ma ahan daryeelka gurmadka degdegga ah.**
Haddii aad la dhibaatooneyso xaalad naf-gooyo ah, sida wadna istaaga ama qabsinka, waa inaad aado qolka gurmadka degdegga ah. Haddii aad yeelato dhaawcyo jireed oo fudud, sida anqaw murgacday, booqo xarunta daryeelka degdegga ah.

# Soo Koobida Dheefta Ceymiska Caafimaadka

Soo koobitaanada qorshaha ceymiska HMO
Taariikhda Dhaqan Galka: 08/01/2021

Kani waa soo koobid kooban oo ku saabsan dheefooyinka. KANI MA AHAN HESHIIS AMA SHAHAADO CEYMIS. Dhammaan dheefooyinka, oo ay ka mid yihiin daryeelka baddelka ah, waxaa loogu talaglay adeegyo caafimaad ahaan muhiim ah. Qofka Xubnaha ah waxaa laga qaadi doonaa qiima wadaaga qaybta yar ee adeega ceymiska leh ama qiimaha saxda ah ee adeegaas. Si aad u hesho qodobadda ceymiska oo dhameystiran, oo ay ku jiraan xadidaadaha, fadlan ka tixraac shahaadadaada ceymiska. Sida waafaqsan Patient Protection and Affordable Care Act of 2010 (Sharciga Ilaalinta Bukaanka iyo Daryeelka Caafimaad ee La Awoodi Karo ee 2010):

- Qiimaha lacag ahaan ugu badan inta aad nooshahay ee dheefaha caafimaadka lagama maarmaanka ah ee ceymiska leh wali ma sii shaqeeyo. Xubnayaasha uu ceymiskooda dhamaaday inay gaareen qiimaha ugu badan inta uu qofka noolyahay aawadeed sida ku xusan ceymiskan waxay xaq u leeyihiin inay iska diiwaangeliyaan ceymiskan.

| Faa'iidooyinka | Shabakada Ceymiska Dhexdeeda |
|---|---|
| Lacag jarista ceymiska | Ma jirto lacagta jarista sanadlaha ah |
| Lacag jarista shaqsi ahaaneed ee la wareejinayo | Ma khuseyso |
| Haraaga lacag jarista kadib ee ceymiska | Haraaga lacag jarista kadib ee ceymiska ma jiro |
| Xadka lacagta jaabka laga bixiyo | **Xadka lacagta jaabka laga bixiyo ee shaqsiyan**: $1,200<br>**Xadka lacagta jaabka laga bixiyo ee qoyska:** $2,400<br>Kharashyada jaabka laga bixiyo ee adeegyadan ceymiska leh ee soo socda waxay ka mid yihiin xadka lacagta jaabka laga bixiyo: Dhammaan kharash qeybsiga ee adeegyada ceymiska leh |
| Muddada sugitaanka xaalad horay u sii jirtay (PEC) | PEC ma jiro |
| Qiimaha ugu badan inta aad nooshahay | Aan xadidinayn |
| Adeegyada bukaan socodka (Booqashooyinka Xafiiska) | Ma jirto khidmadaha adegga ceymiska assaasiga ah/$15 khidmadaha adegga ceymiska takhasuslaha |
| Adeegyada isbitaalka | **Adeegyada bukaan jiifka**: $100 khidmada adeegga ceymiska, maalintiiba ilaa iyo 5 maalmood halki isbitaal dhigisba<br>**Qalliinka bukaan socodka:** $50 khidmada adeegga ceymiska |
| Daawada dhakhtarku qoro<br>(daawooyinka qaarkood ee la isku duro waxaa lagu dabari karaa adeegyada Bukaan Socodka) | Daawooyinka lagu qiimeeyo waxtarkooda/daawooyinka baddelka u ah kuwa kale ee la doorbidayo (tier 1) /daawooyinka shirkadaha gaarka ah ee la doorbidayo (tier 2) $4 / $8 / $25 khidmada adeegga ceymiska daawooyinka 30ka maalmood la qaato |
| Ku iibsashada boostada ee daawada dhakhtarka uu qoro | $5 oo lacag dhimis ah daawoada la qaato 30 bari |
| Daawaynta jir duridda ah | La dabaro ilaa iyo 8 booqasho halki caafimaad ogaanshaba halki muddo sanadeedba iyada oo aysan jirin oggeysiis horudhac ah; booqoshooyin dheeraad ah marka uu ansixiyo qorshaha - $15 khidmadaha adegga ceymiska |
| Adeegyada ambalaaska | Ceymiska wuxuu bixinayaa 80%, waxaad bixinaysaa 20% |
| Balwada maandooriyaha | **Bukaan jiifka:** $100 khidmada adeegga ceymiska, maalintiiba ilaa iyo 5 maalmood halki isbitaal dhigisba<br>**Bukaan socodka:** $0 khidmada adeegga ceymiska |
| Aalad, qalab iyo saad<br>Wax cusub sanadkan:<br>Lacag jarista oo laga dhaafay saadka sonkoworga " iyo "Qalabka daawaynta ilayska ee guriga dhexdiisa<br>oo si buuxda loo dabarayo | Waxaa la dabbaray 50%<br>• Qalabka Caafimaadka ee Raaga<br>• Qalabka lafaha iyo murqaha lagu kabo<br>• Naasa-reebka qalliinka naasaha ka gadaal oo ku xadidan labo (2) lix bilood (6) oo kasta<br>• Saadka caloosha lagu dolooliyo<br>• Qalabyada isbeerka jirka |
| Saadka sonkoworga | Insuliin, cirbado, sirinjeero iyo mindi dalooliso ah-eeg daawooyinka Dhakhtarka uu qoro. Bamka insulin-ta laga qaato ee bannaanka yaalo, mashiinta cabirta sonkorta dhiiga, alaabaha iyo saadka wax lagu baaro—eeg Aalad, qalab iyo saad. Marka Aalad, qalab iyo saad ama Daawada dhakhtarku qoro ay ceymis leeyihiin oo ay xadidaada dheefta leeyihiin, saadka sonkoworga xadidaadahan ma qaban karaan. |

## Soo Koobida Dheefta Ceymiska Caafimaadka HMO ee Kaiser Permanente of Washington, oo sii socota.

| Faa'iidooyinka | Shabakada Ceymiska Dhexdeeda |
|---|---|
| Adeegyada sheybaarka cudur ogaanshaha iyo raajada | **Bukaan jiifka:** Lagu dabaro oo hoos imaada Adeegyada isbitaalka<br>**Bukaan socodka:** Loo dabaro si dhameystiran, MRI/PET/CT $50 khidmadaha adegga ceymiska<br>Adeegyada raajada ee ugu qaalisan sida CT, MR and PET waa in la go'aamiyo inay u Habboonyihiin Caafimaad ahaan waxayna u baahan yihiin oggeysiis horudhac ah marka laga reebo inay la xiriiraan Daryeelka Gurmadka Degdegga ah ama adeegyada bukaan jiifka. |
| Xaaladaha deg-degga ah (khidmada adeegga ceymiska waa la iska dhaafayaa haddii la seexiyo) | $200 khidmada adeegga ceymiska ee xarun cayiman<br>$200 khidmada adeegga ceymiska ee xarun aan cayimnayn |
| Baaritaanada maqalka (joogtada ah) | $0 khidmada adeegga ceymiska |
| Qalabka maqal-kaaliyaha | Lagu dabaro dheef gaar ah: Ceymiska maqalka EPIC. Ma lahan khidmada adegga ceymiska, ilaa iyo $1,200 hashi dhagba 3 sano oo kasta oo laga bixinayo kharashka maqal-kaaliyaha. Wax badan ka baro barta myseiu.be/hearing. |
| Adeegyada Caafimaadka Guriga | Waxaa loo dabaraa si dhameysrtiran. Ma lahan xad booqashada. Oggolaanshaha hore ayaa loo baahan yahay amaceymis ma lahaan doono. |
| Adeegyada daryeelka dadka geerida ku dhaw | Loo dabaro si dhameysrtiran |
| Adeegyada dhalmo la'aanta | Adeegyada caafimaadka iyo qalliinka ee lagu daaweeyo madhalaysnimada iyo dhalmo la'aata iyo dhammaan adeegyada la xiriira, oo ay ku jiraan bacriminta shahwada ee macmalka ah, bacriminta ilmaha banaanka lagu koriyo iyo cudur daaweynta ayaa ceymis leh iyada oo ku xiran kharash qeybsiga adeegyada bukaan socodka ee habboon, oo ku xadidan $50,000 qiimaha ugu badan inta aad nooshahay.<br><br>Daawooyinka dhalmada waxaa lagu dabaraa iyada oo ku xiran lacag jarista iyo 20% haraaga lacag jarista kadib ee ceymiska, oo ku xadidan qiimaha ugu badan inta aad nooshahay oo ah $5,000 |
| Daawaynta daliiga loo adeegsado | Ceymis leh ilaa iyo 10 booqosho halki mudda sanadeedba iyada oo uusan jirin oggeysiis horudhac ah - $0 khidmada adeegga ceymiska.. |
| Adeegyada duugista | Eeg Adeegyada baxnaaninta |
| Adeegyada Dhalmada | **Bukaan jiifka:** $100 khidmada adeegga ceymiska, maalintiiba ilaa iyo 5 maalmood halki isbitaal dhigisba<br>**Bukaan socodka:** $0 khidmada adeegga ceymiska. Daryeelka joogtada ah oo aan ku xirnayn khidmada adeegga ceymiska adeegyada bukaan socodka. |
| Caafimaadka Dhimirka | **Bukaan jiifka:** $100 khidmada adeegga ceymiska, maalintiiba ilaa iyo 5 maalmood halki isbitaal dhigisba.<br>Oggolaanshaha hore ayaa loo baahan yahay ama ceymis ma lahaan doono.<br>**Bukaan socodka:** $0 khidmada adeegga ceymiska |
| Daawaynta dabiiciga ah | La dabaro ilaa iyo 3 booqasho halki caafimaad ogaanshaba halki muddo sanadeedba iyada oo aysan jirin oggeysiis horudhac ah; booqoshooyin dheeraad ah marka uu ansixiyo qorshaha $15 khidmadaha adegga ceymiska |
| Adeegyada Ilmaha Markaa Dhashay | Isbitaal joogista hore: Eeg Adeegyada Isbitaalka: Booqashooyinka xafiiska: Eeg Adeegyada Bukaan Socodka:<br>Daryeelka fayo-qabka joogtada ah: Eeg Daryeelka kahortagga.<br>Kharash wadaag walba oo ku aadan adeegyada ilmaha markaa dhashay waa ka gaar midka hooyada. |
| Adeegyada Cayilka Saa'idka ah La Xiriiro | Ceymiska ku leh kharash qeybi marka shuruudaha caafimaadka la buuxiyo |
| Xubno baddelida | Aan xadidinayn, ma lahan muddo sugitaan<br>**Bukaan Jiifka:** $100 khidmada adeegga ceymiska, maalintiiba ilaa iyo 5 maalmood halki isbitaal dhigisba<br>**Bukaan socodka:** $0 khidmada adeegga ceymiska |
| Daryeelka kahortaga ah:<br>Hubinta fayo-qabka jireed, tallaalada, baaritaanka kansarka makaanka haweenka, raajada naasaha | Loo dabaro si dhameysrtiran<br>Adeegyada daryeelka kahortaga ah ee haweenka (oo ay ku jiraan dawooyinka kahortagga uurka iyo aaladaha iyo jeermis-dilista) dhammaamtood waxaa loo dabaraa si dhamaystiran. |
| Adeegyada baxnaaninta:<br>Booqashooyinka baxnaaninta waa isku geyn booqashooyin daawayn halki mudda sanadeedba | **Bukaan jiifka:** 60 maalmood halki mudda sanadeedba. Adeegyada cudur ogaanshaha caafimaadka dhimirka waxaa lagu dabaraa xadidaad la'aan. $100 khidmada adeegga ceymiska, maalintiiba ilaa iyo 5 maalmood halki isbitaal dhigisba. Oggolaanshaha hore ayaa loo baahan yahay ama ceymis ma lahaan doono.<br>**Bukaan socodka:** 60 booqashooyin halki mudda sanadeedba. Adeegyada cudur ogaanshaha caafimaadka dhimirka waxaa lagu dabaraa xadidaad la'aan.<br>Ma jirto khidmadaha adegga ceymiska assaasiga ah/$15 khidmadaha adegga ceymiska takhasuslaha |
| Xarunta dadka lagu xanaaneeyo | Ceymis dhameystiran leh ilaa iyo 60 maalmood halki mudda sanadeedba |
| Jeermis Diillida<br>(qalliinka xininyaha, qalliinka xubinta taranka haweenka) | Waxaa loo dabaraa si dhameysrtiran. |
| Adeegyada Kala Baxa Qanjaha (TMJ) | **Bukaan jiifka:** $100 khidmada adeegga ceymiska, maalintiiba ilaa iyo 5 maalmood halki isbitaal dhigisba<br>**Bukaan socodka:** $0 khidmada adeegga ceymiska |
| La-talinta barnaamijka joojinta tubaakada | Barnaamijka Quit for Life - waxaa loo dabaraa si dhameystiran |
| Daryeelka araga ee joogtada ah (1 booqasho 12 bilood oo kasta) | $0 khidmada adeegga ceymiska |
| Qalabka araga:<br>Muraayadaha, oo ay ka mid yihiin dhalooyinka isha la saaro iyo fareemka ookiyaalaha | Xubnayaasha ka yar 19 jir: 1 joog oo fareemyo iyo muraayado ah sanadkiiba ama dhalooyinka isha la saaro oo lagu dabarayo 50% lacagaha haraaga lacag jarista kadib<br>Xubnayaasha 19 jirka ah iyo ka wayn: $300 12-ki biloodba |

# Dookhaaga Ceymisyada Caafimaadka

| Bixiyeyaasha | Qiimaha Ugu Badan Sanadka | Lacagta la jaro | Khidmada adeegga ceymiska baaritaanada joogtada ah | Sifooyinka Gaarka ah |
|---|---|---|---|---|
| DELTA DENTAL | $2,000 | $0 | Waxaa loo dabaraa si dhameysrtiran | • Shabakad bixiyeyaal oo balaaran, oo ku jiraan goobaha miyiga |
| Willamette Dental Group | Waxbo | $0 | Waxaa loo dabaraa si dhameysrtiran | • Ku habboon daryeel bixiyeyaasha ku nool I-5 corridor<br>• Ma lahan qiimaha ugu badan sanadka oo leh kharashyo ku baxa ilkaha oo badan |

## Ceymiskaaga ilkaha wuxuu ka mid yahay khidmadaada ceymiska billalaha ee $25.

**Labada qorshe ee ceymiska ilakahaba waxay bixiyaan dheefaha toosinta Ilkaha.**

**Ma rabtaa inaad baddelato qorshahaga ceymiska ilkaha?** Buuxi oo soo celi Codsiga Dheefaha Caafimaadka markay tahay Luuliyo 20, 2021.

---

DELTA DENTAL®

## Qorshaha Ceymiska PPO

**Taariikhda Dhaqan Galka 8/1/2021**

**Muddada Dheefta:** 1/1/2022 - 12/31/2022
**Qiimaha Ugu Badan ee Muddada Dheefta:***
**(halki qofba; ma khuseyso Class I):** $2,000
**Toosinta Ilkaha—Dadka wawayn iyo Carruurta:** 50%
**Qiimaha Ugu Badan Inta Aad Nooshahay (halki qofba):** $2,000

| | Dhakhtarka Ilkaha PPO ee Delta Dental | Dhakhtarka Ilkaha Delta Dental Premier | Dhakhtarka Ilkaha ee Madaxa Banaan |
|---|---|---|---|
| **Lacag Jarista Muddada Dheefta** | | | |
| Lagama qaadayo adeegyada Class 1 ee bixiyaha ceymiska u shaqeeya—ma lahan lacag jaris bixiyaha aan u shaqeynin shirkada—halki mudda dheefeed $50 | $0/$50 | $50 | $50 |
| **Class 1- Cudur Ogaansho iyo Kahortag** | | | |
| Baaritaanada<br>Nadiifinta<br>Foloraydh<br>Raaajooyinka<br>Bacda la saaro ilkaha | 100% | 80% | 80% |
| **Class II - Ilka Soo Celinta** | | | |
| Soo ceelinta ilkaha<br>Buuxinta cadeynta ee ilakaha danbe<br>Cilmiga cudurada iyo daaweynta iliga gudihiisa (Xidid Dilidda)<br>Cilmiga cudurada iliga waxa ku wareegsan<br>Qalliinka Afka | 100% | 60% | 60% |
| **Class III - Adeegyada Wawayn** | | | |
| Ilkaha Macmalka ah<br>Ilkaha Qeybta Ahaan Macmalka ah<br>Bir Gelinta Iliga<br>Lafaha Ilkaha Xiriiriya<br>Lafaha Iliga Laga Dul Galiyo | 80% | 40% | 40% |

*Wax cusub sanadkan! Qiimaha Ugu Badan Sanadka waa lacagta ugu badan uu ceymiskaaga bixinayo sanadkiiba. Wixii adeeg ilko ah ee ka badan lacagtan, waa inaad jeebkaaga ka bixiso marka laga reebo kharashyada adeegyada Class 1.

**Fadlan ogoow:** Tani waa guudmar kooban oo ku saabsan dheefaha la heli karo si la iskula barbardhigo oo kaliya oo kama dhigna heshiis. Marka lagaa diiwaangeliyo qorshe ceymis waxaad awood u yeelan doontaa inaad isticmaasho buug-yarahaaga dheefaha kaas oo faahfaahin dheeraad ah ka bixin doona Qorshahaaga Ceymiska Delta Dental PPO. Fadlan xor ayaad u tahay inaad soo wacdo waaxdeena adeega macmiilka ama inaad booqato boggeena intarnetka ee DeltaDentalWA.com haddii aad wax su'aalo ah qabto.

# Ka hel faa'iidada ugu badan dheefahaaga!

### Sameyso akoonka MySmile®

Waxay kuu sahleysaa, inaad 24/7 awood u yeelato inaad isticmaasho kaarkaaga ID-ga, macluumaadka dheefta, qiyaasta kharashka jaabka laga bixiyo oo ammaan ah iyo wax kale oo badan! Qalabkeena “Find your member ID” ("Raadi ID-gaaga Xubinnimada") wuxuu fududeeyaa diiwaangelinta. Booqo DeltaDentalWA.com si aad akoonkaaga u furto.

### Dooro dhakhtarka ilkaha ee u shaqeeya shirkada ceymiska

Qorshahaaga ceymiska wuxuu ku sahlayaa inaad isticmaasho shabakada Delta Dental PPO. Sikastaba, dheefeha waxay ugu dheeryihiin marka aad booqoto dhakhtarka ilkaha Delta Dental PPO. Booqo DeltaDentalWA.com si aad u hesho dhakhtar u shaqeeya shirkadaada (ka baro sida loo sameeyo bogga xigga).

Qorshahaaga ceymiska wuxuu sidoo kale wataa awooda adeegsiga shabakada Delta Dental Premier®, taas oo kaa caawineysa inaad hesho dhakhtarka ilkaha PPO oo ka baxsan deegaankaaga haddii loo baahdo. Tani waxay ka dhigan tahay inaad iska ilaalin karto kharashka badan ee bixiyaha aan u shaqeynin shirkada (eeg jadwalka hoose).

### Hawlo badan oo ilkaha ayuu ceymisku dabaraa

Kharashyadda Class I laguma xisaabo Qiimahaaga Ugu Badan Sanadka, taas oo ka dhigan in wax badan oo ka mid ah kharashyadaada Class II iyo III lagu dabaro ceymiska.

| | PPO | Premier | Bixiyaha aan u shaqeynin shirkada ceymiska |
|---|---|---|---|
| Shabakada ilkaha ee qorshahaaga ceymiska | ✓ | | |
| Dheefaha waxay gaaraan meesha ugu badan taas oo ka dhigan kharashada jaabka ka baxo oo yar | ✓ | | |
| Wuxuu kuu dirayaa foomyaasha xaqsheegashada | ✓ | ✓ | |
| Waxay la imaataa mareynteena tayada leh iyo kharash ilaalinta | ✓ | ✓ | |
| Ma jiro kharash ku baxo ilaalinta taas oo ka dhigan kharashada jaabka ka baxo oo yar | | | ✓ |

### Hel dhakhtarka ilkaha ee u shaqeeya shirkada ceymiska ee kuu dhaw:

1. Booqo **DeltaDentalWA.com**
2. Guji ‘Online Tools’ ('Qalabka Onalynka') oo adeegso qalabkeena ‘Find a Dentist’ ('Hel Dhakhtarka Ilkaha')
3. Guji ‘Delta Dental PPO’ si aad u kala shaandeysid natiijooyinka kaaga soo baxaya raadinta

### U booqo dhakhtarkaaga ilkaha si joogta ah.

Qorshahaaga ceymiska wuxuu dabaraa daryeelka kahortaga ah sanad walba. Nadiifinta iyo hubinta joogtada ah waxay muhiim u yihiin inaad lahaato dhoola cadeyn caafimaad leh waxayna ka hortagtaa dhibaatooyinka xanuunka leh, qaaliga ah inta uu waqtiga sii socda.

### Hel qiyaasta kharashyada jaabka laga bixiyo.

Inaad ogaato kharashkaaga waxay ka saacidaa adiga iyo dhakhtarkaaga ilkaha inaad qorsheysataan daawaynta si aad isku deeqsiisaan dheefihiina.

**MySmile Cost Genie℠** waxay ku siineysaa qiyaasta kharashyada, oo degdega ah. Waxay ku wanaagsan tahay daawaynta aassaasiga ah sida buuxinta. Gal oo keliya akoonkaaga MySmile account si aad u hesho qiyaasta shaqsi ahaan laguugu diyaariyay.

Marka aad u baahan tahay daawayn ballaaran, sida lafta iliga la galiyo, ka dalbo dhakhtarkaaga "hubinta horudahaca ah." Waxaad ka heli doontaa dhakhtarkaaga ilkaha **Xaqiijinta Daawaynta iyo Kharashkeeda**. Waxay faahfaahin ka bixisaa qorshaha daawayntaada, waxay ay dabarayaan dheefahaaga iyo cadadka lacagta uu kaaga yeelan karo dhakhtarkaaga ilkaha daawaynta.



## Su'aalo miyaad qabtaa? Wac Delta Dental.

## 1-800-554-1907

Isniin-Jimce, 7 a.m. to 5 p.m. Pacific time

Willamette
Dental Group

# Qorshaha Ceymiska Ilkaha

**Taariikhda Dhaqan Galka 8/1/2021**

Iyada oo ay damaanad qaadeyso Willamette Dental of Washington, Inc. Qorshahan ceymiska wuxuu bixiyaa ceymiska adeegyo balaaran si looga hortaggo, loo ogaado oo loo daaweeyo cudurada ama xaaladaha ilkaha iyo unugyada taageera. Kuwa la soo bandhigay kaliya qaar ka mid ah habraacyada ugu badan ee lagu dabaro qorshahaaga. Fadlan ka eeg Shahaadadaada Ceymiska faahfaahinta qorshaha ceymiska, xadidaadaha iyo waxyaabaha reeban oo dhameystiran.

| Dheefaha | Khidmadaha adegga ceymiska |
|---|---|
| Qiimaha Ugu Badan Sanadka | Ma Lahan Qiimaha Ugu Badan Sanadka |
| Lacagta la jaro | Ma lahan Lacagta la jaro |
| Booqashada Xafiiska ee Guud iyo Ilka Simmida | Ma Lahan Khidmadaha Adegga Ceymiska booqashadiiba |
| **Adeegyada Cudur Ogaanshaha iyo Kahortagga** | |
| Baaritaanada Joogtada ah iyo kuwa Gurmadka Degdegga ah, Raajooyinka, Ilka naadiifinta, Daaweynta Foloraydh, Bacda La Saaro Ilkaha (Halki iligba), Baaritaanka Kansarka ee Madaxa iyo Luqunta, Tilmaamta Nadaafada Afka, Cabirka Ciirdka iyo Iliga u Dhaxeeya, Qiimeynta Caafimaadka Ciirdka iyo Ilkaha | Waxaa lagu Dabaraa Khidmadaha Adegga ceymiska ee Booqashad Xafiiska |
| **Daawaynta Ilkaha ee Ilka Soo Celinta** | |
| Ilka buuxinta (Amalgam) | Waxaa lagu Dabaraa Khidmadaha Adegga ceymiska ee Booqashad Xafiiska |
| Birta Dhoobka Leh ee La Geliyo Ilkaha | Waxaad bixineysaa $250 oo ah Khidmada Adeegga Ceymiska |
| **Cilmiga Buuxinta Ilkaha Macmalka ah** | |
| Ilkaha Hoose ama Kore oo Dhameystiran | Waxaad bixineysaa $400 oo ah Khidmada Adeegga Ceymiska |
| Lafaha Ilkaha Xiriiriya (halki Iligba) | Waxaad bixineysaa $250 oo ah Khidmada Adeegga Ceymiska |
| **Cilmiga Cudurada iyo Daaweynta Iliga Gudihiisa & Cilmiga Cudurada Iliga Waxa Ku Wareegsan** | |
| Daweeynta Xidid Dilidda – Ilkaha hore | Waxaad bixineysaa $85 oo ah Khidmada Adeegga Ceymiska |
| Daweeynta Xidid Dilidda – Ilkaha dhexe | Waxaad bixineysaa $105 oo ah Khidmada Adeegga Ceymiska |
| Daweeynta Xidid Dilidda – Goosaha dambe | Waxaad bixineysaa $130 oo ah Khidmada Adeegga Ceymiska |
| Qalliinka Lafta Ciridka (Ilkaha halki Geesba) | Waxaad bixineysaa $150 oo ah Khidmada Adeegga Ceymiska |
| Ilka Sifeynta (Ilkaha halki Geesba) | Waxaad bixineysaa $75 oo ah Khidmada Adeegga Ceymiska |
| **Qalliinka Afka** | |
| Ilig Bixin (Hal Ilig) | Waxaa lagu Dabaraa Khidmadaha Adegga ceymiska ee Booqashad Xafiiska |
| Qalliinka Ilig Bixinta | Waxaad bixineysaa $100 oo ah Khidmada Adeegga Ceymiska |
| **Daaweynta Toosinta Ilkaha** | |
| Daaweynta Ka Hor Toosinta Ilkaha | Waxaad bixineysaa $150 oo ah Khidmada Adeegga Ceymiska** |
| Daaweynta Toosinta Ilkaha ee Dhameystiran | Waxaad bixineysaa $2,500 oo ah Khidmada Adeegga Ceymiska |
| **Bir Gelinta Iliga** | |
| Qalliinka Bir Gelinta Iliga | Dheefta bir gelinta iliga ee ugu badan oo ah $1,500 halki Mudda sanadeedba |
| **Waxyaabo kala duwan** | |
| Kawaawiso | Waxaa lagu Dabaraa Khidmadaha Adegga ceymiska ee Booqashad Xafiiska |
| Lacagaha Shaybaarka Ilkaha | Waxaa lagu Dabaraa Khidmadaha Adegga ceymiska ee Booqashad Xafiiska |
| Nitrous Oxide | Waxaad bixineysaa $40 oo ah Khidmada Adeegga Ceymiska |
| Booqashada Xafiiska Takhasuslaha | Waxaad bixineysaa $30 oo ah Khidmada Adeegga Ceymiska halki Booqashaba |
| Madhawga Daryeelka Gurmadka Degdegga ah ee Goobta Ka Baxsan | Waxaad bixineysaa khidmado ka badan $250 |

*TMJ waxay leedahay $1000 oo ah qiimaha ugu badan sanadka/ $5000 oo ah qiimaha ugu badan inta aad nooshahay

**Khidmada adegga ceymiska waxaa lagu shubayaa khidamada Daaweynta Toosinta Ilkaha ee Dhameystiran haddii macmiilka uu aqbalo qorshaha ceymiska ee daaweynta.

## Waxyaabaha Reeban

Lafaha ilkaha xiriiriya, lafaha iliga laga dul galiyo, ilkaha macmalka ah, ama qalabyada isbeerka jirka ee u baahan taariikhyo daawayn oo fara badan ama haddii sheyga isbeerka jirka ah la rakibo ama la keeno wax ka badan 60 maalmood ka dib markii la joojiyo ceymiska.

Dhameystirka ama bixinta daawaynta ama adeegyada la bilaabay ka hor taariikhda dhaqan galka ee ceymiska. bir gelinta iliga, oo ay ku jiraan qalabyada lagu qabanayo, dayactirka iyo adeegyada la xiriira bir gelinta iliga.

Adeegyada cilmiga cudurada iliga gudihiisa, adeegyada lafaha iliga laga dul galiyo iyo bir gelinta ilkaha ee la bixiyay ka hor taariikhda dhaqan galka. Daaweynta cilmiga cudurada iliga gudihiisa ee la dhameystiray wax ka badan 60 maalmood ka dib joojinta ceymiska. Baaritaanada iyo la-tashiyada loo baahan yahay kali ahaantooda ee la xiriira adeeg aan ceymis lahayn. Adeegyada tijaabada ama baaritaanka ah iyo baaritaanada la-tashiyada la xiriira.

Dib u hagaajinta afka ee dhameystiran, oo ay ku jirto dib u soo celinta afka ee ballaaran ee lagu soo celinayo lafaha iliga laga dul galiyo, lafaha ilkaha xiriiriya, ama bir gelinta ilkaha; iyo toosinta is-qabashada ilkaha oo ay ku jiraan lafaha iliga laga dul galiyo, lafaha ilkaha xiriiriya, ama bir gelinta ilkaha kuwaas oo loo adeegsado ujeedada kabida, wax baddelida cabirka taagan, soo celinta isqabashada ilkaha ama sixidda is cunista ilkaha, xoqid, ama burburka ilkaha.

Daryeelka isbitaal dhigista ee ka baxsan xafiiska ilkaha ee qaliinka ilkaha, adeegyada dhakhtarka, ama lacagaha xarunta. Adeegyada lafaha iliga laga dul galiyo ee qalka iyo wajiga.

Caaga habeenki ilkaha la gashto.

Ilka soo celinta shaqsiga loogu talagalay.

Qalliinka dib u hagaajinta ama qurxinta ilkaha iyo adeegyada ama sahayda kale, kuwaas oo asal ahaan looga dan leeyahay in lagu horumariyo, wax looga baddelo, ama lagu xoojiyo muuqaalka.

Kaniiniyada iyo daawooyinka horudhaca ah ee dhakhtarku uu qoro iyo kuwa tukaanka laga iibsado.

Khidmadaha ballanta la imaan waayay ama ballanta la baajiyay iyada oo aan ogeysiis horudhac ah oo 24 saac laga bixinin.

Baddelida qalabka ilkaha ee lumay, la waayay, ama la xaday; baddelida qalabka ilkaha ee dhaawacmay iyada oo ay ugu wacan tahay xadgudub, si xun u adeegsiga, ama dacayaca.

Baddelida soo celinta ilkaha ee wanaagsan.

Adeegyada iyo baaritaanada ama la-tashiyada la xiriira ee aan ku jirin qorshaha daaweynta ee la qoray iyo/ama uusan ku talanin oo uusan oggolaanin dhakhtarka ilkaha ee Willamette Dental Group.

Adeegyada iyo baaritaanada ama la-tashiyada la xiriira ilaa iyo heer aysan muhiim u ahayn cudur oggaanshaha, daryeelka, ama daaweynta xaalada ku lug leh.

Adeegyada uu bixiyo qof kasta aan ka ahayn dhakhtarka shatiyeysan, dhaktarka ilkaha macmalka ah, dhaktarka ilka nadiifinta, ama kaaliyaha dhakhtarka ilkaha.

Adeegyada daaweynta dhaawacyada lala kulmay inta loo tabbabaranayay ama laga tartamayay tartanka ciyaaraha fudud.

Adeegyada daaweynta dhaawac ama cudur lagu dabaro ceymiska magdhawga shaqaalaha ama ah mas'uuliyada Loo-shaqeeyaha.

Adeegyada daaweynta dhaawacyada uu qofka si ula kac ah isugu sababay.

Adeegyada ceymiska loo heli karo sida ku xusan barnaamijka federaalka, gobalka, ama kuwa kale ee dawlada, inuu sharciga farayo ma ahane.

Adeegyada aan ku qorneyn heshiiska inay ceymis leeyihiin.

Adeegyada aan lahayn cadeyn muujineysa sababaha iyo saameynta, cilada, ama cudur aan ka ahayn adeegyada kahortagga ee ceymiska leh.

## Xadeynada

Haddii adeegyada baddelka ah loo adeegsan karo in xaalad lagu daweeyo, adeegga uu ku taliyo dhakhtarka ilkaha Willamette Dental Group waa la dabari doonaa.

Adeegyada ku xusan heshiiska, kuwaas oo loo bixiyay in lagu saxo cilladaha lagu dhasho ama korriinka ee daciifiyo shaqooyinka ilkaha iyo waxyaabaha taageera waxaa laga dabari doonaa carruurta kugu tiirsan haddii baahida ilko la xaqiijiyo. Qalliinka qalka waxaa loogu dabaraa si gaar ah heshiiska marka uu dhakhtarka ilkaha Willamette Dental Group go'aamiyo inay habboontahay oo uu u oggolaado qalliinka qalka in lagu daaweeyo qof diiwaangashan, oo ka yar da'da 19 oo leh cilladaha lagu dhasho ama korriinka.

Lafaha iliga laga dul galiyo, ilka soo celinta kale ee sida dadban loo sameeyay ayaa ceymis leh kaliya haddii ay u habboon yihiin caafimaad ilko ahaan iyo haddii uu ku taliyo dhakhtarka ilkaha ee Willamette Dental Group.

Markuu uu dhaktarka ilkaha ee Willamette Dental Group sameeyay daaweynta xidid dilidda ee hore, dib u daaweynta daawada xidid dilidda waxaa lagu dabari doonaa iyada oo qayb ka ah daaweynta hore ee 24-ta bilood ee ugu horeyso. Marka uu daaweynta xidid dilidda ee hore uu sameeyay bixiye aan u shaqeynin shirkada ceymiska, dib u daaweynta daawada xidid dilidda ee noocaas ah ee dhakhtarka ilkaha ee Willamette Dental Group waxaa lagu dalaci doonaa khidmadaha adegga ceymiska ee habboon.

Daawada suuxisada waxaa lagu dabaraa khidmadaha adeegga ceymiska ee lagu magacaabay heshiiska haddii lagu fuliyo xafiiska ilkaha; iyada oo lala bixinayo adeeg ceymiska leh; oo u habboon caafimad ilko ahaan sababta oo ah qofka diiwaangashan ayaa ka yar da'da 7 jir, korriin ahaan u cuuryaaman ama jir ahaan u cuuryaaman.

Adeegyada uu dhakhtarka ilkaha ku bixiyo goob isbitaal ayaa ceymis lagu dabaraa haddii caafimaad ahaan ay u habboon yihiin; uu qoraal ahaan horay ugu sii oggolaato dhaktarka ilkaha Willamette Dental Group; adeegyada la bixinayo ay la mid yihiin isla adeegyada lagu bixin lahaa xafiiska ilkaha; oo khidmadaha adeegga ceymiska ku habboon la bixiyo.

Dib u baddelida ilkaha macmalka ah, lafaha iliga laga dul galiyo, ilig buuxinta iliga guduhiisa, korka kore, ama qalabka lafaha iliga laga dul galiyo ayaa ceymiska lagu dabaraa haddii qalabka uu kuugu jiray 5 sano ka badan oo baddelida ay tahay daaweynta qorshaha ceymiska oo habboon si dheefahaaga si buuxda looga faa'iideysto.

# Erayada Guud ee Ceymiska

Baro qeexitaanada qaar ka mid ah erayada guud ee ceymiska si aad si wanaagsan ugu fahamto siyaasada ceymiskaaga.

**Lacagaha haraaga lacag jarista kadib**
Lacagaha haraaga lacag jarista kadib waa qayb boqolkiiba kharashka aad ku bixiso adeegyada caafimaadka ka dib markii laguugu sameeyo lacag jarista (haddii qorshahaaguu uu leeyahay).

**Khidmadaha adegga ceymiska**
Khidmadaha adegga ceymiska waa lacagta aad ku bixiso booqashooyinka dhakhtarka, booqashooyinka qolka gurmadka degdegga ah iyo inta badan daawooyinka dhakhtarka uu qoray. Qorshayaasha ceymiska qaarkood ayaa kaaga baahan inaad bixiso khidmadaha adegga ceymiska baddelki lacag jaris laguugu sameen lahaa. Qorshayaasha kale waxay kaaga baahan karaan labaduba. Khidmadahaaga adegga ceymiska kuma xisaabsana lacagta lagaa jaro, balse waxay ku xisaaban yihiin lacagta jaabka laga bixiyo.

**Lacagta la jaro**
Lacagta la jaro waa lacagta aad bixineyso inta ay socoto muddada ceymiska (inta badan hal sano) ee adeegyda ceymiska leh ee daryeelka caafimaadka ka hor inta uusan qorshahaaga ceymiska bilaabin inuu bixiyo. Lacag jarista waxaa laga yaabaa in lagaa qaadin adeegyada oo dhan mana ahan in qorshayaasha dhammaan ay leeyihiin lacag jarista. Qorshayaasha ceymiska qaarkood, lacag jarista waxaa laga qaadaa oo keliya adeegyada uu bixiyo bixiye aan u shaqeynin shirkada ceymiska.

**Xaq u yeelashada**
Waxaad xaq u leedahay ceymiska caafimaadka ee SEIU 775 Benefits Group ka dib markii aad shaqeyso ugu yaraan 80 saacadood oo mushahar leh bishiiba ugu yaraan laba bilood oo isku xiga. Si aad xaq ugu sii lahaato ceymiskaaga, waa inaad sii wado inaad shaqeyso 80 saacadood bishiiba.

**Adeegyada Khidmada iyo Lacagaha Haraaga Qiimaha Jaban vs Adeegyada Khidmada iyo Lacagaha Haraaga Qaaliga ah**
Adeegyada khidmada iyo lacagaha haraaga qiimaha jaban waa adeegyada qorshaha ceymiskaaga lagu dabaro oo aad ku heli karto khidmadaha adegga ceymiska/lacagaha haraaga lacag jarista kadib oo jaban ama aan jirinba. Adeegyada khidmada iyo lacagaha haraaga qaaliga ah waa kuwa wali lagu dabaro qoshaha ceymiskaaga, balse yeelan kara khidmadaha adegga ceymiska/lacagaha haraaga lacag jarista kadib oo ka badan adeegyada khidmada iyo lacagaha haraaga qiimaha jaban.

**Aqoonsiga Xubnaha**
Aqoonsigaaga Xubnaha waa lambar gaar ah oo adiga kula xiriira oo u sahlaya bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka iyo shaqaalahooda inay xaqiijiyaan ceymiskaaga oo ay lacag bixinta adegyada diyaariyaan. Sidoo kale waa lambarka shirkadaha ceymiska caafimaadka ay u adeegsadaan inay ku raadiyaan xubno gaar ah oo ay uga jawaabaan su'aalaha aad ka qabi karto xaqsheegashadaada iyo dheefahaaga. Lambarkaaga Aqoonsiga Xubnaha waxaa laga heli karaa kaargaaga Aqoonsiga Xubnaha.

**Shabakada Shirkada Ceymiska**
Shabakada shirkadaada ceymiska waxay ka kooban tahay xarumo, bixiyeyaal (dhakhaatiir, kaalkaaliyeyal) iyo adeegayaal qorshahaaga ceymiska uu heshiis la leeyahay inuu bixiyo adeegyada daryeelka caafimaadka.

**Xadka Lacagta Jaabka Laga Bixiyo**
Xadka lacagta jaabka laga bixiyo waa wadarta lacagta aad bixineyso ka hor inta uusan bilaabin qorshahaaga ceymiska inuu bixiyo 100% kharashka caafimaadka ee ceymiska leh inta ka dhiman sanadka oo dhan. Guud ahaan, khidmadaha adegga ceymiska, lacagaha haraaga lacag jarista kadib iyo bixinta lacagaha adeegyada qiimaha jaban waxaa lagu xisaabiyaa xadkan.

**Bixiyaha Daryeelka Assaasiga ah ama Bixiye (Dhakhtar)**
Bixiyaha daryeelka assaasiga ah waa dhakhtar ama bixiya kale oo daryeelka caafimaad ah oo aad arki karto si aad uga hesho daryeel joogta ah. Waxaad ka xulan kartaa bixiyahaaga daryeelka assaasiga ah bogga intarnetka ee qorshahaaga ceymiska. Qorshayaasha ceymiska qaarkood ayaa si ootomaatig ah kuugu qoondeyn kara, balse waxaad iska baddeli kartaa xilli walba.

**Khidmada Caymiska ee Billaha ah/Lacagta ceymiska billaha ah**
Khidmada Caymiska ee Billaha ah (ama lacagta ceymiska billaha ah) waa lacagta aad ku bixiso ceymiska caafimaadka bil walbo, haddii aad dhakhtar aragto iyo haddii kalaba. Daryeel bixiyeyaasha lagu dabaro ceymiska SEIU 775 Benefits Group, lacagtooda caymiska ee billaha ah waa $25 oo kaliya bishiiba.

**Adeegyada Bukaan Socodka vs Adeegyada Bukaan Jiifka**
Adeegyada bukaan jiifka waa mida kaaga baahan inaad isbitaalka habeenki barido. Tusaalayaasha qaar waxay noqon karaan ila dhalida ama qalliinada qaarkood. Adeegyada bukaan socodka waa adeeg kasta oo aanan u baahnayn inaad isbitaalka u jogto.

**Ka Dhaafidda ama Ka Dhaafidda Ceymiska**
Haddii aadan rabin inaad isku diiwaangeliso ceymiska caafimaadka ama aad jeclaan lahayd inaad soo afjarto ceymiskaaga (haddii aad horay u diiwaangashanayd), waxaad foom onlayn ah ka buuxin kartaa *My Plan* ama waxaad wici kartaa Adegga Macmiilka si aad u codsto foom warqad ah. Haddii aad doorato inaad iska dhaafto ceymiska, ma awoodi doontid inaa markale dib isku diiwaangeliso ilaa iyo laga gaaro Open Enrollment (Muddada Diiwaangelinta Sanadlaha ah ee Ceymiska Caafimaadka) ee 2022.

SEIU 775 BENEFITS GROUP

Barasho– Caafimaad– Hawlgab– Shaqooyin



Daniel M.
Bixiyaha daryeelka, Lynnwood

## Open Enrollment (Muddada Diiwaangelinta Sanadlaha ah ee Ceymiska Caafimaadka) waa **Luuliyo 1 – Luuliyo 20**

Iskudiiwaangeli ama wax ka baddel ceymiskaaga onlayn ahaan adiga oo isticmaalaya *My Plan*!

**myseiu.be/oe-myplan**

**Su'aalo miyaad qabtaa?**
Wac **1-877-606-6705**